



Uqorista daawada opioid ee bukaanka

Wax kaqabashada masiibada opioid ta kadhalata ayadoo la adeegsanaayo isbadalo lagu sameeyo qorista daawada iyo kormeer

Ayadoo laga jawaabaayo masiibada kadhalatay daawada opioid ee Gobalka Washington iyo wadanka oo dhanba, laanta sharciga ayaa magacawday shan gole iyo gudi oo qaabilsan qorista daawada si ay u abuuraan una dhaqangaliyaan shuruudo looraaci doono qorista daawada.

Department of Health (Waaxda Caafimaadka), oo kaashanaysa golayaasha iyo gudiyada, ayaa bixinaysa waxbarasho iyo wacyi galin kusaabsan shuruudaha cusub ee qorista daawada opioid.

Boggaan waxaa kuqoran macluumaad loogu talagalay dhakhaatiirta, bukaanada, iyo dadwaynaha.

Macluumaadka aasaasiga ah

Masiiboyinka Opioid

Boqolaal qof oo gobalkeena kudhaqan ayaa udhinta qaadashada kuuro xad dhaaf ah oo daawada opioid ah sanad kasta, taasoo kujira daawooyinka dadka looqoro iyo kuwa maandooriyaasha ah sida heroin ta labadaba. Dhibaataada ayaa ah masiibo dhanka caafimaadka bulshada ah. Tiro badan oo kamid ah dadka kabadbaada dhibaataada qaadashada kuurada xad dhaafka ah ayaa wali loosii qoraa daawada opioid kadib markay si xad dhaaf ah ucunaan. Bishii Oktoobar sanadkii 2016, Gudoomiyaha gobalka. Jay Inslee ayaa soosaaray amar fulineed oo loogu aqoonsanaayo adeegsiga khaldan ee daawada opioid “xaalad caafimaad oo masiibo iyo geeri keenaysa.” Amarkiisa ayaa lagu dalbaday in looga hortago isticmaalka qaldan iyo iskabadinta daawada opioid.

Jawaabta laanta Sharciga

Sanadkii 2017, [haayada sharci dajinta ayaa meel mariyay sharci](#) diirada saaraaya kor uqaadista xaalada qorista daawada opioid, iyo xaaladaha lasocoshada daawooyinka dadka looqoro. Sharciga ayaa kadoonaaya shan kamid ah gudiyada khubarada daryeelka caafimaadka iyo ururadu inay meel mariyaan xeerar cusub oo qofka loogu qoraayo daawooyinka opioid:

- Medical Commission (Gudigga Caafimaadka)
- Board of Osteopathic Medicine and Surgery (Gudigga Daawada Jirka iyo Qaliinka)
- Nursing Commission (Gudigga Kalkaalinta)
- Dental Quality Assurance Commission (Gudigga Xaqiijinta Tayada Caafimaadka Ilkaha)
- Podiatric Medical Board (Gudigga Caafimaadka Caruurta)

Hanaanka Hormarinta Xeerarka

- Shanta gudi ayaa abuuray shaqaale dhanka qorista daawada opioid qaabilsan oo wakiilo ay kuleeyihiin gudi kasta. Farsamo Yaqaano kasocda Pharmacy Quality Assurance Commission (Gudigga Xaqiijinta Tayada Farmashiga) iyo shirkado kaladuwan oo dhanka daryeelka caafimaadka qaabilsan ayaa si firfircoon qayb uga ahaa hanaanka.
- Lagasoo bilaabo bishii Sebteembar 2017 ilaa Maarso 2018, shaqaalaha ayaa kulano kuqabtay gobalka si ay macluumaad ugasoo aruuriyaan muwaadiniinta caadiga ah, bukaanada xanuunsanaya, ururada shaqaalaha, hogaamiyaasha bulshada, adeeg bixiyaasha daryeelka caafimaadka, iyo iskaashatada caafimaadka bulshada.
- Sida kasoo baxday gabagabadii kulankii ugu danbeeyay oo laqabtay bishii Maarso 2018, kooxda shaqaalaha ah ayaa abuuray nidaam xeerar iskudhafan oo ay tahay in gole kasta iyo gudi kasta uu naqshadeeyo uuna kudabaqo shaqooyinkooda qaaska ah.
- Shanta gole iyo gudiyada ayaa qabtay kulano dheeri ah si ay udabaqaan xeerarkii sidii larabay, ayna u ansixiyaan luuqada qabyo qoraalka xeerka. Waxay soogudbiyeen baakadaha hal xeer oo soojeedin ah intii lagu jiray xiligii xagaaga sanadkii 2018.
- Dhamaan shanta gole iyo gudi ayaa qabtay kulano dhagaysi bulsho kadibna dhaqan galiyay luuqada xeerka lasoo jeediyayintii lagu jiray bishii Agoosto iyo Sebteembar sanadkii 2018.

Xiligii Dayrta 2017 - Biloowga Xiliga gu'ga 2018

- Kooxda Shaqada
- Waxay abuureen xeerar qabyo ah ayadoo hadafku ahaa in lahelu xeerar rasmi ah oo shaqo kasta lagu dabaqo.

Xiliga gu'ga 2018

- Golaha iyo Gudiyada
- Waxay wax kabadaleen ayna dib unaqshadeeyeen xeerarka haboon si loo abuuro luuqada xeerka qabyada ah loona siiyo shaqaalahooda.

Xiliga Xagaaga 2018

- Golaha iyo Gudiyada
- Ayaa aqbalay fikrado qoran, qabtay kulano dhagaysiga dad waynaha, kadibna wax kabadalay xeerarka hadii loobaahdo.

Biloowga Xiliga Dayrta 2018

- Department of Health (Waaxda Caafimaadka)
- Waaxda ayaa dib u eegis kusamaysay dhamaan luuqadaha lasoo jeediyay ee katimid dhamaan golayaasha iyo gudiyada.

Dhamaadka Xiliga Dayrta 2018

- Department of Health
- Waxay soogudbisay go'aanka ugu danbeeya ee luuqada xeerka ee katimid golayaasha iyo gudiyada ayadoo kaashanaysa Tafatiraha Xafiiska Anshaxa.

Alaabta Cilmi Kororsiga Kooxda Shaqada Qorista Daawada Opioid

Kooxda Shaqada Qorista Daawada Opioid ayaa qabteen todobo kulan cilmi kororsi oo ay kuqabteen daafaha gobalka ayagoo macluumaad ugasoo aruurinaayay muwaadiniinta caadiga ah, hogaamiyaasha bulshada, adeeg bixiyaasha daryeelka caafimaadka, iyo iskaashatada caafimaadka bulshada. Hoos waxaa kuqoran taariikhaha kulano dhacayaan, qalabka kulanada, iyo dukumiintiyada kooxda shaqadu u adeegsadeen abuurista xeerka qanuunka ah ee qabyada ah.

Bukaanada

Macluumaadka Xeerarka daawo Qorista ee cusub oo loogu talagalay Bukaanada iyo Bulsho waynta:

Qofkasta wuxuu xaq uleeyahay in xanuunkiisa si wanaagsan loodaaweeyo. Opioids waxay kaacaawin kartaa xanuunka, laakiin sidoo kale waxay leedahay khataro. Inaad wax kabarato shuruudaha cusub ee qorista daawada ee Washington waxay uhiim utahay qofkasta oo gobalka kudhaqan qaatana daawada opioids.

Shuruudaha cusub waxaa loosameeyay in lagu yareeyo qayb ahaan sida khaldan ee loo adeegsado daawada opioid. Waxaa sidoo kale loogu talagalay in lagu difaaco daryeelka dhamaan bukaanada, ayna kujiraan bukaanada xanuunka qaba. Xeerarku madiidayaan in lasameeyo maarayn wanaagsan oo dhanka xanuunka ah.

Macluumaadka Bukaanaka

Washington State Department of Health (Waaxda Gobalka Washington uqaabilsan Caafimaadka) waxay leedahay ilo macluumaad oo kaladuwan si looga caawiyo bukaanadu inay fahmaan shuruudaha cusub ee qorista daawada opioid.

- [Waxaan ahay bukaan qaba xanuun daran](#)
- [Macluumaadka Bukaanaka Xanuunka Qaliinka](#)
- [Macluumaadka Bukaanaka Xanuunka Daran qaba](#)
- [Macluumaadka Bukaanaka Xanuunka Qayb ahaan Daran qaba](#)

Su'aalaha Badanaa Nalawaydiiyo ee kusaabsan Bukaanka iyo Dad waynaha

Waa maxay daawooyinka opioid?

Opioids waa nooc daawooyin ah oo loo adeegsado hoos udhigida xanuunka. Qubarada caafimaadka ayaa bukaanka uqori kara daawooyinka opioids si ay ubaabiyaan xumad dhexe ilaa mid daran. Codeine, fentanyl, oxycodone, methadone, hydrocodone, iyo morphine ayaa kamid ah maadooyinka laxakameeyo.

Macluumaadka Opioids

Washington State Department of Health (Waaxda Gobalka Washington uqaabilsan Caafimaadka):

- [Uqorista daawada opioid ee bukaanka](#)
- [Uqaado sidii Laguugu Qoray](#)
- [Washington Poison Center](#)
- [Washington State Drug Takeback Program \(Barnaamijka Dib usoocelinta Daawada ee Gobalka Washington\)](#)

Dawlada Federaalka ah:

- [Centers for Disease Control and Prevention - Tilmamaha Looga Hortago Sumoobida](#)
- [Drug Enforcement Administration](#)

Maxaa loo aqoonsanyahay inuu yahay xumad daran?

Xumad daran waxay socotaa 12 asbuuc ama kabadan. Waxaad halkaan kahelaysaa [macluumaad dheeri ah oo kusabsan xanuunka daran ee \(PDF\)](#).

Maxaa loo aqoonsanyahay inuu yahay xumad daran?

Xumad daran waxay socotaa ilaa lix asbuuc. Waxaad halkaan kahelaysaa [macluumaad dheeri ah oo kusabsan xumada daran ee \(PDF\)](#).

Maxaa loo aqoonsanyahay inuu yahay xumad qayb ahaan daran?

Xanuun qayb ahaan daran wuxuu socotaa lix ilaa 12 asbuuc. [Waxaad halkaan kahelaysaa macluumaad dheeri ah oo kusabsan xanuunka qayb ahaan daran \(pdf\)](#).

Waxaa la iisheegay in dhakhtarkayga caafimaadku uusab mar danbe awoodin inuu iiqoro daawada opioids. Arintaas ma runbaa?

Maya, shuruudaha cusub waxay kaliya qeexayaan waxa muhiimka ay tahay in adeeg bixiyaasha caafimaadku ay racaan markay bukaanka uqorayaan daawooyinka opioids. Haddii aad qabto su'aalo kusaabsan baahiyo daryeelka caafimaadka ah oo gaar ah, fadlan laxariir dhakhtarkaaga.

Xeerarku maxadidayaan cadad daawada opioids ee aan qaadan karo?

Xeerarka cusub ayaa xadidaad gaar ah usamaynaaya daawada lagu qoro ee qaar kamid ah daryeelka noocyada xanuuno gaar ah. Hase yeeshee, waxay usahlayaan adeeg bixiyaasha caafimaadka inay kabadiyaan xadidaadahaas haddii ay jirto sababo dukumiinti kucad.

Xeerarka cusub maleeyihiin hanaan sharci ah oo lagu yaraynaayo isticmaalka daawada?

Maya. Sharciga cusub wuxuu faahfaahinayaa xaaladaha marka yaraynta daawadu muhiim tahay. Laxariir dhakhtarkaaga caafimaadka haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo kusaabsan yaraynta daawada.

Haddii aad tahay bukaan xanuun ba'an qaba oo qaata kuuro badan aana xariir cusub lasameeyo dhakhtar cusub, ma waxaa la iga doonayaa in la iga yareeyo kuurada aan hadda qaato ee opioids ka?

Muhiim maaha. Haddii aad qaadanayso kuurada daawada opioids oo dagan aana kasii darayn, aad si wanaagsan uraacday heshiisyada qoran ee oo qorshayaasha daawayntaada, aadna leedahay awood shaqo oo cadayn haysata, maaraynta xanuunka, ama cadaymo muujinaaya inaad soo bogsootay, markaas waxaa suuragal ah in dhakhtarkaaga cusub uu haysto 90 maalmood oo uusan samaynayn hoos udhigida qasabka ah si fursad loosiiyo qiimaynta daawada saxda ah lagugu siinaayo. Dhakhtarkaaga caafimaadka ee mudada dheer ayaa wax kabadali kara daawooyinka lagu qoray ee opioids asagoo raacaaya qiimayn iyo baahiyaha kiiska bukaan kasta.

Haddii aan qabo inaan helin daryeel sax ah, yaan laxariiri karaa?

Waxaad cabasho ugudbin kartaa Department of Health adoo iimayl udirayaa ama taleefanka kawacaaya. Waa kanaa hanaanka cabashada iyo anshaxa ee Department of Health. Hakaan waxaad kahelaysaa su'aalo iyo jawaabo kusaabsan hanaanka cabasho gudbinta.

Waa maxay qiimaynta halistu?

Waa aalad kacaawisa dhakhtarka caafimaadka inuu baaro suuragalnimada in daawada la iskabadiyay ama si khaldan loo adeegsaday.

Marka laga fiirsho xeerarka cusub, ma waxaa qasab igu noqonaysa inaan dhakhtar kale uwareego si la iigu qoro daawooyinka opioids?

Maya. Sharciga iyo xeerarku qasab kama dhigayaan inaad badesho dhakhtarka daryeelka caafimaad kusiiya. Dhakhtarkaaga caafimaadka qasab kuma aha inuu joojiyo aragaaga. Xaalado

gaar ah markay jiraan dhakhtarkaaga caafimaadka ayaa codsan kara talobixin uu kahelo khabiirka dhanka xanuunka.

Dhakhtarkaygu majoojin karaa inuu i arko haddii aan daryeelkiisa xanuunka ugu jiro sababo laxariira inuusan doonayn inuu iiqoro daawada opioids?

Maaha wax sax ah in dhakhtar kasta oo uu yahayba uu joojiyo daawaynta bukaanka asagoon bixin cadayn ogaysiinaysa in bukaanka laga saaray daryeelka. Sidaas ayadoo ay jirto, hadana dhakhtarku wuxuu xaq uleeyahay inuu joojiyo lakulanka bukaanka.

Waxaan ahay bukaan qaba xanuun ba'an. Waa maxay shuruudaha laga doonaayo dhakhtarkayga si uu iigusii wado daawooyinka opioid?

- Waxay kuxirantahay dhakhtarkaaga daryeelka kusiiya, iyo xaalada daryeelkaaga iyo baahiyahaaga. Lahadal dhakhtarkaaga caafimaadka.
- Dhakhtarka ayaa ubaahan kara casharo dheeri ah oo laga siiyo qorista daawada opioid.
- Dhakhtarka ayaa ubaahan kara inuu talo kaqaato khabiir dhanka xanuunka ah, kuuna gudbin kara khabiirka xanuunka si uu talooyin kuusiiyo.
- Haddii daryeelkaaga iyo xanuunkaaguba yihiin kuwo dagan, aad wali cunayso isla kuurada daawada, dhakhtarkaaga ayaa kaliya xaaladaadaan kuqori kara diiwaankaaga bukaanka.

Waxaan ahay bukaan qaba xanuun ba'an, ma la iigudbinayaa khabiir dhanka xanuunka ah?

- Muhiim maaha. Waxay kuxirantahay dhakhtarkaaga daryeelka kusiiya, taariikhdaada caafimaad, iyo qorshaha daryeelkaaga.
- Waxaa lagu gudbin karaa khabiir dhanka xanuunka ah, ama
- Dhakhtarkaaga caafimaadka ayaa codsan kara talobixin uu kahelo khabiirka dhanka xanuunka.
- Xeerarka ayaa fasaxaaya xaalado talobixinta lagasoo reebaayo markay jiraan xaalado gaar ah.

Maqasabay igu tahay inaan badelo daawadayda xanuunka?

Sharciga iyo xeerarku mabadelayaan daawadaada xanuunka ama kaa xarimayaan dhakhtarkaaga caafimaadka inuu kuuqoro daawada. Taasi waa go'aan idiin yaala adiga iyo dhakhtarkaaga caafimaadka.

Maqasab baa inaan meel adag kuxareeyo daawada la iiqoray ee opioid?

Haa. Lahadal dhakhtarkaaga caafimaadka si uu kuugu sheego sidaad naftaada iyo qoyskaagaba badqabkooda u ilaalin lahayd. Kafiiri macluumaad dheeri ah oo kusaabsan xaraynta daawada lagu qoray ee opioid hoos

Maxaan kusameeyaa daawadayda opioid ee aanan isticmaalin?

Si aad qashinka ugu darto daawada aadan ubaahnayn, waydii farmashiiyahaaga meesha aad qashinka kuridayso oo kuugu dhaw. Haddii aadan meesha qashinka kusoo ridi karin daawada aadan isticmaalin, kurid wasakhda daawada ama qashinka dhalo kadibna tuur ayado kujirta dhaladeedii hore ee aan caruurtu furi karin biyuhuna gali karin. Haku falaashin musqusha.

Waxaad booqan kartaa www.doh.wa.gov/drugtakeback Si aad macluumaad uga hesho Drug Takeback Program oo hadda ladhisaayo kaasoo sidoo kale macluumaad kabixinaaya daawooyinka aan la isticmaalin.

Kawaran hadaan qaato daawooyin kale?

Usheeg dhakhtarkaaga caafimadka iyo farmashiilaha macluumaadka dhamaan daawooyinka kale ee aad qaadato. Waxaa suuragal ah inay aad khatar tahay inaad iskudarto daawooyinka xanuunka iyo daawooyinka kale ee lagu qoray iyo daawooyinka aad dukaanada kasoo gadato. Daawooyinka qaarkood waxay sii xoojin karaan waxtarka daawada opioids marka lalacuno daawada. Haddii aad leedahay wax kabadan hal dhakhtar, xaqiiji inaad dhamaantood ogaysiiso dhamaan daawooyinka aad cunayso. Daawooyinka waxaa kujira daawooyin kasta oo feetamiin ah.

Waa maxay Naloxone?

Waa daawo maandooriyaha kaadifaacaysa taasoo loo adeegsado daawaynta xanuunka kadhaha marka la iskabadiyo maandooriyaha. Waxay si kumeelgaar ah uleexinaysaa saamaynta daawooyinka opioids waxaana badanaa loo adeegsadaa daawo badbaadin ah marka la iskabadiyo daawada opioid. Fadlan kalatasho dhakhtarkaaga wixii su'aalo ah oo kusaabsan daawada naloxone.

Yaan laxariirayaa hadaan su'aalo qabo?


[Fadlan arag bogeenaa aad nagalasoo xariirayso si aad uga hesho macluumaadka aad nagalasoo xariirayso.](#)

Macluumaadka Kale ee Bukaanka

Helitaanka Maaraynta Xanuunka

- Haddii aad leedahay adeeg bixiye daryeelka caafimaadka oo qaas ah, laxariir daryeel bixiyaha si uu kuusiyoo daryeel ama kuugu gudbiyo daryeelka aad ubaahantahay.
- Haddii **aadan lahayn** adeeg bixiye daryeelka caafimaadka oo qaas ah, laxariir shirkadaada caymiska caafimaadka.
- Haddii aadan haysan caymis daryeelka caafimaadka ah, waa inaad radisaa [sidaad kuheli lahayd caymis](#) ama wac 1-855-923-4633.

Cayiskaagu waa inuu kusiiyaa helitaanka daryeelka maaraynta xanuunka. Haddii aad dhibaato kuqabto qaadashada adeegyada, laxariira Office of the Insurance Commissioner (komishanka Xafiiska Caymiska) adoo kawacaaya 1-800-562-6900.

Medicare / Caymis	Apple Health	Managed Care Plan (Qorshaha Daryeelka Maaraysan)* oo ay bixiso Apple Health ama Shirkad Caymis oo Gaar looleeyahay
<p>Caymiska: Wac lambarka kuyaala dhabarka danbe ee kaarkaaga caymiska si lagu caawiyo. Haddii aadan aqoon sida loola xariiro shirkadaada caymiska, wac 1-800-562-6900.</p> <p>Medicare: Wac lambarka kuyaala dhabarka danbe ee kaarkaaga caymiska si lagu caawiyo. Haddii aadan aqoon sida loola xariiro shirkadaada caymiska kusiisa, wac 1-800-562-6900.</p>	<p>Raadso daryeel bixiye wac 1-800-562-3022.</p> <p>Caymiska Apple Health (Medicaid)</p> 	<p>Managed Care Plan* oo ay bixiso Apple Health ama Shirkad Caymis oo Gaar looleeyahay Wac lambarka kuyaala dhabarka danbe ee kaarkaaga caymiska si lagu caawiyo.</p> <p>*Amerigroup, Community Health Plan of Washington, Coordinated Care of Washington, Molina, United Healthcare Community Plan.</p>

Gaarista balantaada caafimaadka

- Haddii aad leedahay caymiska Medicaid, [raadso gadiid aad kutagto balantaada caafimaadka.](#)

Caawimaada Masiibooyinka

- Haddii aad ladala dhacayso xakamaynta xanuunkaaga aadna dareemayso rajo la'aan ama niyad jab, fadlan wac **National Suicide Prevention Lifeline (Laynka Caawimaada Qaran ee Kahortaga Isdilka) oo ah 1-800-273-8255.**
- Haddii aad kunooshahay Degmada King, wac laynka Crisis Clinic(Caafimaadka Masiibooyinka) oo ah 1-866-789-1511.
- Degmo kasta oo kutaala Washington waxay leedahay xarun caafimaad oo masiibooyinka ah. Raadso [xarun caafimaadka masiibooyinka](#) ee kuudhaw.
- Haddii aad aaminsantahay inaad ubaahantahay adeegyada daawaynta, laxariir [Washington Recovery Helpline \(Laynka Caawimaada Sookabashada Washington\)](#) oo ah 1-866-789-1511.
- Si aad uhesho macluumaad iyo ilo aad kahesho aaga aad kunooshahay, laxariir [local public health department \(waaxda caafimaad ee deegaankaaga\)](#).

Walaacyada Kabixida:

- Haddii aad si degdeg ah ujooyiso daawadaada xanuunka si degdeg ah, waxaad dareemi kartaa xanuun kadhaha joojinta daawada. Inaad daawada joojiso way kugu adkaan kartaa, laakiin sida badan wax dhibaato uma gaysanayso jirkaaga. Astaamaha waxaa kamid noqon kara walaac daran, nasiino la'aan, lalabo, shuban, murqo xanuun, ama qarow.
- Haddii aad qaadanayso dawada benzodiazepine sida Xanax, Valium, ama Ativan muddo dheer aadna si degdeg ah aad ujooyiso, waxaa suuragal ah inaad waajahdo dhibaato aad udaran, oo xataa noloshaada khatar galisa.
- Haddii xanuunkaaga ama astaamaha kadhaha joojinta dawadu noqdaan kuwo daran, utag waaxda xaaladaha degdega ah ee isbitaalka deegaankaaga ama xarun caafimaad oo daryeelka degdega ah bixisa.
- Laxariir dhakhtarkaaga caafimaadka hadaad qabto su'aalo dheeraad ah.

Khayraadka Washington State Department of Health (Waaxda Gobalka Washington uqaabilsan Ilaha ee Caafimaadka)

- [Washington State Department of Health Bogga Daawada Opioide](#)
- [Uqaado sidii Laguugu Qoray](#)

Ilaha Kale ee Heer Gobal iyo kuwa Federaalka

- [Washington Poison Center](#)
- [Centers for Disease Control and Prevention - Tilmamaha Looga Hortago Sumoobida](#)
- [Drug Enforcement Administration](#)

Nalasioo Xariir

Imayl noogu soodir: OpioidPrescribing@doh.wa.gov

Washington Medical Commission (Gudigga Caafimaadka ee Washington)

Medical.commission@doh.wa.gov

360-236-2750

[Webseetka](#)

Nursing Care Quality Assurance Commission (Gudigga Xaqiijinta Tayada Caafimaadka Kalkaalisada)

Nursing@doh.wa.gov

360-236-4703

[Webseetka](#)

Board of Osteopathic Medicine and Surgery (Gudigga Daawada Jirka iyo Qaliinka)

Osteopathic@doh.wa.gov

360-236-4766

[Webseetka](#)

Dental Quality Assurance Commission (Gudigga Xaqiijinta Tayada Caafimaadka Ilkaha)

Dental@doh.wa.gov

360-236-4893

[Webseetka](#)

Podiatric Medical Board (Gudigga Caafimaadka Caruurta)

Podiatric@doh.wa.gov

360-236-4941

[Webseetka](#)

Prescription Monitoring Program (PMP, Barnaamijka Lasocoshada Daawada La iskuqoro)

Prescriptionmonitoring@doh.wa.gov

360-236-4806

[Webseetka](#)

Pharmacy Quality Assurance Commission (Gurigga Xaqiijinta Tayada Farmashiga)

Wspqac@doh.wa.gov

360-236-4946

[Webseetka](#)

[Xarunta Wicitaanka Adeegyada Macaamiisha](#)

hsqa.csc@doh.wa.gov

Taleefonka: 360-236-4700

[Webseetka](#)

P.O. Box 47865

Olympia, WA 98504-7865

Si aad uhesho macluumaad muhiim ah oo iimayl laguugu soodiro kuna saabsan Qorista Daawada opioid fadlan dooro batoonka cagaaran ee “Subscribe (Lasoco) oo kuyaala salka hoose ee bogga.